

## **Macluumaad ku saabsan hawl-socod siinta xogta wada jirka ah**

### **“Nidaamka macluumaadka caawimaada iyo daryeelka”**

#### **sida waafaqsan qodobka 13 iyo 14 ee Xeerka Ilaalinta Xogta Guud (DSGVO)**

#### **Magaca iyo faah-faahinada xiriirka ee ilaaliyaha:**

Bundesamt für Fremdenwesen und Asyl (Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka)

Modecenterstraße 22, 1030 Wien

Teleefoonka: +43- 59 133 98 7004

Faakiska: +43- 59 133 98 7399

li-maylka: [BFA-Einlaufstelle@bmi.gv.at](mailto:BFA-Einlaufstelle@bmi.gv.at)

#### **Faah-faahinada xiriirka ee shaqaalaha ilaalinta xogta:**

Teleefoonka: +43- 59 133 98 - 0

li-maylka: [BFA-Datenschutzbeauftragter@bmi.gv.at](mailto:BFA-Datenschutzbeauftragter@bmi.gv.at)

#### **Ujeeddooyinka loogu talagalay hawl-socod siinta midaas oo loogu danleeyahay xogta shakhsiyeed:**

Hawl-socod siin la wadaago oo ku saabsan xogta shakhsiyeed ee dadka laga daryeelo dhinaca Xafiiska Socdaalka Federaalka iyo Magan-galyada, xafiisyada gobolada loo xilsaaray daryeelka dadka ajnabiga ah ee waafaqsan qodobka 2, cutubka 1 ee Heshiiska Adeegaha iyo Daryeelka Aasaasiga ah iyo wasiirka Federaalka ee arimaha Gudaha

#### **Aasaaska sharciiyeed ee loogu talagalay hawl socod siinta:**

Qodobka 8 ee Qaanuunka Federaalka ee ku saabsan Bixinta Daryeelka Aasaasiga ah iyo Adeegaha la siiyo Dadka Magan-galyo raadiska ah iyo Ajaaniib kale oo U qalma 2005 (GVG-B 2005) ayada oo xiriir la leh Heshiiska Adeegaha iyo Daryeelka Aasaasiga ah sida waafaqsan qodobka 15a ee Qaanuunka Dustuurka Federaalka (B-VG)

#### **Muddada la keydin doono xogta shakhsiyeed:**

Xogtu waa in la tiro labbo sanno kadib marka ay dhacdo bixinta adeegaha iyo daryeelka aasaasiga ah, la bixiyay oona u baahnayn hadda wax hawl-socod siin ah oo xakad la geliyay ama ujeeddo dib u dejin sida waafaqsan qodobka 11 ee Heshiiska Adeegaha iyo Daryeelka Aasaasiga ah.

#### **Qaybaha dadka qaatayaasha ah ee qaata xogta shakhsiyeed:**

machadyo khaas ah ama kaniisado, banii'aadanimo ah sida loogu sheegay sharciga hay'adaha ee Midowga ama Gobolada Federaalka ah; machadyo mas'uul ka ah bixinta dheefaha ugu yar ee loogu talagalay-tijaabin; Adeega Shaqaalaynta Dadweynaha ee Austariya (AMS); machadyada dammaanada bulshada; maamulada maaliyada; maamulada gobolka ee maamulka sida maamulada caafimaadka; maamulada ammaanka; maamulada nolol wanaaga dhallinyarada; Maal-gelinta Isdhexgalka Austariyan; Xafiiska Wakiilka Sare ee Qaramada Midoobay ee loogu talagalay Qaxootida ku nool dalka Austariya; maamulada magan-galyo raadiska iyo socdaalka dadka ajnabiga ah; bixiyayaasha guri kuwaas oo matali doona ururada (loo xilsaaray bixinta adeegaha iyo daryeelka aasaasiga ah); shirkado gaadiid

loo xilsaaray in ay gaadiid ku qaadaan dadka ajaaniibta ah ee u baahan taakulo iyo ilaalin kuwaas oo u qalma taakulada (dadka magan-galyo raadiska ah, dadka u qalma magan-galyada, dadka guri la'aanta ah iyo dad kale oo aan la dhoofin karin sababo sharciyeed ama waaqici ah); Maamulka Diiwaan-gelinta SourcePIN ee ah gudaha shuruudaha lagu qoray Qaanuunka Dowlada-E; Tirakoobyada Austariya Hawl-fuliyayaasha (sida loogu qeexay gudaha qodobka 4, maadada 8 ee DSGVO ku xigta qodobka 36, qaybta 2, maadada 9 ee Qaanuunka Ilaalinta Xogta (DSG)); Wasiirka Arimaha Gudaha ee Federaalka; IBM Österreich - Internationale Büromaschinen Gesellschaft m.b.H.; Microsoft Österreich GmbH; Bundesrechenzentrum GmbH; Atos IT Solutions and Services GmbH

### **Xuquuqaha qofka xogta:**

Xaqa loogu soo gudbiyo cabasho Maamulka Ilaalinta Xogta Austariya (1080 Wien, Wickenburggasse 8, teleefoonka +43 1 52 152-0, iimaylka [dsb@dsb.gv.at](mailto:dsb@dsb.gv.at)) waxaa lagu dabakhayaa sida sida waafaqsan qodobka 24, cutubka 1 ee Qaanuunka Ilaalinta Xogta (DSG).

Xaqa gelida waxaa lagu qoray gudaha qodobka 15 ee DSGVO.

Xaqa sixida waxaa lagu qoray gudaha qodobka 16 ee DSGVO.

Xaqa tirida ('xaq loo leeyahay in la iska iloobo') waxaa lagu qoray qodobka 17 ee DSGVO.

Maya xaqa loo leeyahay in la diido sida waafaqsan qodobka 21 DSGVO iyo maya xaqa xadidaada hawl-socod siinta sida waafaqsan qodobka 18 ee DSGVO (qodobka 8, cutubka 4 ee Qaanuunka Federaalka ee ku saabsan Bixinta Adeegaha iyo Daryeelka Aasaasiga ah kuwaas oo la siiyo dadka Magal-galyo Raadiska ah iyo Ajaaniib kale oo U qalma 2005 (GVG-B)) ay yihiin kuwo la dabakhi karo.